

#### Wax badan kaga ogow xogsidayaasha la xiriira:

- Saadka Xaaladda Gurmadka
- U Diyaarsanida Masiibada ee Shakhsiyaadka iyo Qoysaska
- U Diyaargarawga Guriga

Macluumaad dheeraad ah, booqo [Take5toSurvive.com](http://Take5toSurvive.com)

#### Kaga xirnaw Twitter

PublicAlerts:  
[@PublicAlerts](https://twitter.com/PublicAlerts)

Adeegga Cimilada Qaranka ee Portland:  
[@NWSPortland](https://twitter.com/NWSPortland)

Cascades-ka Laanqayrta Cas:  
[@RedCrossCasc](https://twitter.com/RedCrossCasc)

Xafiiska Oregon ee Maamulka Xaaladda Gurmadka:  
[@OregonOEM](https://twitter.com/OregonOEM)

Degmada Washington:  
[@WashcoOregon](https://twitter.com/WashcoOregon)

Waddada Degmada Washington:  
[@WashcoRoads](https://twitter.com/WashcoRoads)

#### Barnaamijyada Xaaladda Gurmadka



**Everbridge** waxay kaaga digtaa xaaladaha gurmadka iyo dhacdooyinka bulshada ee daran Degmada Washington markii ay dhacayaan..



**PulsePoint** waxay taageertaa shakhsiyaadka awoodda u leh inay siiyaan kaalmada naf-badbaadinta dhibbanayaasha wadnuhu joogsado.



**Emergency American Red Cross** waxay kuu saamaxdaa inaad la socoto xaaladaha aaggaaga ama aagagga ay ehelkaagu joogaan, hubiso si aad u ogaato haddii ehelkaagu ammaan yihiin kuuna sheegta inaad ammaan kujirto.



**Nextdoor** Isticmaal Nextdoor si aad xogogaal ugu noqoto waxa ka socda xaafadda aad deggan tahay. Degmada Washington iyo magaalooyinku waxay ku wadaagaan macluumaad muhiim ah Nextdoor.



**FEMA** waxay gaarsiisaa wargelin dhakhso badan oo la isku hallayn karo oo kusaabsan cimilada xun ilaa shan goobood waddanka oo dhan. Waxa kamid ah macluumaadka badbaadada iyo talooyin u diyaarsida ah.

**Farriinta qoraalka ah ee taleefanka ayaa fican** Muddada masiibadu jirto, u isticmaal wicitaanada taleefanka ujeedooyinka gurmadka oo kaliya, sida wicitaanka 911 si aad caawimo aad u hesho – wixii intaa ka soo hara farriimaha qoraalka ah isticmaal. Farriinta qoraalka ah way shaqaysaa marka khadadku mashquulka yihiin. Haddii aadan wici karin 911 sababtoo ah mashuul khadka ah, isku day inaad farriin qoraal ah u dirto 911 ([www.bit.ly/1sNGMRC](http://www.bit.ly/1sNGMRC)).

#### Digniinaha Xaaladda Gurmadka Bilaa Xarigga (Wireless Emergency Alerts, WEA)

Taleefankaaga gacantu wuxuu awoodaa inuu kuu sheego cimilada khatarta leh, carruurta maqan, iyo xaaladaha kale ee daran isagoo isticmaalaya Digniinaha Xaaladda Gurmadka Bilaa Xarigga. Hubi in qaybtani ay shaqaynayso taleefankaaga.

#### Ku xirnaw macluumaadka u diyaarsanida

[Take5toSurvive.com](http://Take5toSurvive.com) waa isha aannu ka helno macluumaadka u diyaarsanida masiibada ee Degmada Washington. Waxaad ka heli doontaa xogsidayaal, mashaariic u diyaarsanida ah oo shan daqiiqo soconaya, iyo macluumaad badan oo u diyaarsanida masiibada oo caawimo leh.

[Ready.gov](http://Ready.gov) waa websayt u diyaarsanida xaaladda gurmadka ee qaranka ah oo ay kujiraan macluumaad badan oo cajiib ah oo u diyaarsanida masiibada ah. Waxaad ka heli doontaa macluumaad kusaabsan halisaha, qalabka qorshaha xaaladda gurmadka, iyo khayraadka oo cid kasta loogu talagalay.

[RedCross.org](http://RedCross.org) waxa kujira macluumaad cajiib ah oo u diyaarsanida xaaladda gurmadka ah, linkiyaha dhacdooyinka maxalliga ah iyo fasallo lagu dhigto xirfadaha masiibada, awoodda wax bixinta si aad u taageerto dadka masiibadu saamaysay, iyo in kale.

## Ku xirnow macluumaadka tooska ah

### Macluumaadka cimilada meel kasta

[Mobile.weather.gov](http://Mobile.weather.gov) waxa bixiya Adeegga Cimilada Qaranka. Websaytkan moobilka lagu isticmaali karo waxa kujira macluumaadka cimilada oo toos ah (oo ay kujiraan la socoshada iyo digniinaha cimilada daran) iyo saadaalinaha cimilada maxalliga ah.

### Macluumaadka tooska ah marka guriga

**NOAA Weather Radio** waa meel laga helo digniinaha cimilada daran oo toos ah iyo xaaladaha halista ah ee kale ee deegaanka ka jira. Raadiyowiyadu waxay isticmaalaan teknoolojiyadda goobta si ay u hubiyaan inaad kaliya hesho digniinaha adiga ku khuseeya.

### Nidaamka wargelinta bulshada

[PublicAlerts.org](http://PublicAlerts.org) wuxuu kuu saamaxaa inaad isku diiwaangaliso wargelinaha xaaladda gurmada ee gurigaaga, dugsiga, ama goobta shaqada Degmada Washington. Waxaad dooran kartaa inaad ku hesho digniinaha wicitaan taleefan, farriin qoraal ah, ama iimeyl.

## Ku xirnow dadka iyo bulshadaada

Waxa jira qaabab kale oo loola xiriirto dadka kale ee u diyaarsanida kujira. Degmada Washington waxay martigalisaa Citizen Corps iyo barnaamijyada la shaqeeya taasi oo ah qaabab cajiib ah oo isdirenimo loogu shaqeeyo loogana qaybgalo.

Himilada Citizen Corps waa xoojinta awoodda qofka kasta iyadoo u maraysa waxbarasho, tabobar, iyo adeegga isdirenimo si ay uga dhigto bulshooyinka qaar ammaan badan, xoog badan, oo si dhaanta ugu diyaarsan ka jawaabidda khataraha argagixisada, faldambiyeedyada, arrimaha caafimaadka dadwaynaha, iyo masiibooyinka noocyadooda kala duwan. Barnaamijyada bixiya fursado isdirenimo iyo kaqaybgal waxa kamid ah Amateur Radio Emergency Service, Community Emergency Response Team, Medical Reserve Corps, iyo Neighborhood Watch.

## **Kaqaybgal: Barnaamijyada Isdirenimo ee Degmada Washington**



**Amateur Radio Emergency Service  
(Adeegga Xaaladda Gurmada  
Raadiyaw Amateur)**  
[washcoares.org](http://washcoares.org)



**Community Emergency Response Team  
(Kooxda Gargaarka Xaaladda Gurmada Bulshada)**  
[www.bit.ly/2QhwAN8](http://www.bit.ly/2QhwAN8)



**Medical Reserve Corps  
(Ciidanka Kaydka Caafimaadka)**  
[www.bit.ly/2ZjHllr](http://www.bit.ly/2ZjHllr)



**National Neighborhood Watch  
(Badbaadada Xaafadda ee Qaranka)**  
[www.bit.ly/2Z4pLGO](http://www.bit.ly/2Z4pLGO)